

Ma ku cusubtahay Kanada?

Ka qeyb qaata maktabadaha. Waa bilaash ama lacag la'aan.

- Caruurtiina guusha dugsigooda ku kaalmeeya
- Waxaad raadisaan ama wareysataan dadka dalka ku cusub qaabka wax loogu qabto
- Xog wareysta siyaabaha shaqada loo helo
- Ka soo amaahda buugaagta, CD-yada iyo cajaladaha muqaalka oo luqado kala duwan lagu heli karayo.
- Adeegsiga Kombiyuuterka iyo ka faa i'daysiga Internet-ka.
- La baashaala qoyskiina

Caruurtiina guusha dugsigooda ku kaalmeeya

- Maktabadaha ka deysada ama ka soo qaata buugaag guriga aad ku akhridaan. Waxaana laga helaa buugaag luqado kala duwan ku qoran iyo Ingiriiskaba. Luqad kasta oo caruurtiina wax aad ugu akhridaan wuxuu ku kaalmeynayaa barashada afka Ingiriiska.
- Xilliga Kuleylaha, caruurtiina waxaad ku dhiirgalisaan inay ka qeyb qaataan kooxda akhriska kulaylaha ([Summer Reading Club](#)) iyo barnaamijyada kaleba.
- Shaqaalaha maktabaddu waxay ilmihinna ku caawinayaan howlaha dugsiga laga soo siiyo (School Projects)

Waxaad raadisaan ama wareysataan dadka dalka ku cusub qaabka wax loogu qabto

- Waxaad u kuur gashaan, sida loo helikarayo barnaamijyada dawladda iyo kan bulshada ee bilaashka ah oo loogu tala galay dadka dalka ku cusub..
- Ka soo deysada buugaagta iyo cajaladaha idin ku caawinaya barashada Luqadda Ingiriiska

Xog wareysta siyaabaha shaqada loo helo

- Barta qaabka shaqada loo raadiyo. Maktabadaha waxaad ka helaysaan xogwarran badan oo ku saabsan shaqooyinka.
- Waxaad raadisaan waxbarashada iyo xirfadaha aqoonsiga leh.
- Raadiya xogwarran ku saabsan qiimeynta shahadooyinkiina ee dhinaca shaqooyinka iyo siyaabaha loo heli karayo xirfadaha iyo shaqooyinkaba.

Ka soo amaahda buugaagta, CD-yada iyo cajaladaha muqaalka oo luqado kala duwan lagu heli karayo.

- Maktabaduhu waxay hayaan buugaag, cajaladaha maqalka, CD-yada, majalooyinka iyo wargeysyada oo luqado kala duwan ku saleysan.

Adeegsiga Kompuuterka iyo ka faa i'daysiga Internet-ka.

- Adeegsiga Internet-ku oo bilaash ah ama lacag la'aan ah.
- Waxaad akhridaan wararka dunida ku saabsan oo luqado kala duwan ku soo baxa
- Waxaad barataan siyaabaha loo adeegsado Internet-ka, E-mail- ka iyo maktabadahaba.

La baashaala qoyskiina

- Ka qeyb qaata arrimaha qoyska, sida ay uga sheekeeyaan sheekooyinkii hore.
- Barnaamijyada ka qeyb gala, si aad ugu kor qaadaan aqoontiina luqadda Ingiriiska iyo sidaad ula qabsan laheydeen noolasha Canada.
- Maktabadaha qabow ee qaboojiyaha leh Ku raaxeysta.

Ka mid noqda ama ku biira maktabadaha

- Si aad maktabahaha uga mid noqotaan waxaad u baahandoontaan:
 - Hal aqoonsi oo rasmi ah;
 - Caddeyn adreeskiina – sida, biilasha Telefoonka, laydhka / nalka ama TV-ga

Caruurtu waxay yeelan karaan kaarka (Card) maktabadda oo u gaar ah.